




Food and Agriculture Organization  
of the United Nations



**Nidaamyada Hawlgalka Rasmiga ah (NHR)  
ee Ayaxa Lama-dagaanka Sahaminta  
Dhulka**



# **Nidaamyada Hawlgalka Rasmiga ah (NHR) ee Ayaxa Lama-dagaanka Sahaminta Dhulka**

**Waxaa soo diyaariyey:  
Hay'ada Beeraha & Cuntada ee  
Qaramada Midoobey (FAO)**

Waxaa kharashka ku turjumida  
Af-soomaaliga ku deeqey:  
Hay'ada Horumarinta Samofalka  
Jarmalka (GIZ)  
Waxaa turjumey:  
Axmed Maxamuud Cabdi (Filibin)

August, 2021  
Jigjiga, Itoobiya

Aqoonsiga tilmaameed ee la sameeyay iyo soo bandhigida macluumaadka waxyaabaha ku jira qoraalkan macnaheedu ma aha mid muujinaysa ra'yi kasta/waxwalba oo ah dhinaca Hay'ada Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO/HBC) ee ku saabsan sharciga ama xaalada horumarka dal kasta, dhul, magaalo, aag ama maamulkeeda, ama ku saabsan soohdinta ama soohdimmaeeda. Sheegida shirkado gaar ah ama alaabada soosaarayaasha, macnaheedu ma ahan in kuwani ay taageertay ama ay kadoorbiday FAO/HBC

kuwa kale ee la midka ah dabeeecadaha aan la xusin. Aragtiyada lagu muujiyey walaxdan macluumaadka waa kuwa qoraaga/qorayaasha ugaar ah kamana tarjumayaan aragtiyada ama siyaasada FAO/HBCFAO/HBC waxay dhiirigalineysaa isticmaalka, soo saarista iyo faafinta walxaha ku jira badeecadan macluumaadka ah. Marka laga reebo halka kale ee lagu muujiyey, maaddada waa la koobiyeyn/nuqulkasaari karaa, la soo dejinsan karaa lana daabici karaa daraasad gaar loo leeyahay, cilmi-baadhis iyo ujeedo waxbaris, ama adeegsiga alaaboooyin ama adeegyo aan ganacsi ahayn, iyadoo la bixinayo/la xusayo aqoonsiga ku habboonee FAO/HBC waa asalka iyo qofka leh xuquuqda lahaanshaha la siiyay iyo in ogolaanshaha aragtiyaha, waxsoosaarka ama adeegyada isticmaalayaashu sinnaba ugama muuqdaan.

Ujeedada	1
<b>1.</b> Diyaargarowga horumarsan	2
<b>2.</b> kooxda sahaminta & agabka	3
<b>3.</b> Sahaminta kahor	4
<b>4.</b> Qabashada sahaminta	5
<b>5.</b> Abaabulida sahaminta	6
<b>6.</b> Hababka sahaminta – lug-kugooshida	7
<b>7.</b> Sahamunta kaddib	10
<b>8.</b> Goorta iyo halka laga sameynayo sahaminta	11
<b>9.</b> Noocyada sahaminta	13
<b>10.</b> Maxay tahay xogta la ururinayo	15
<b>11.</b> Sidee xogta loo keydinaya	16
<b>12.</b> Isticmaalida eLocust3	17
<b>13.</b> Isticmaalida eLocust3m	18
<b>14.</b> Isticmaalida eLocust3g	19
<b>15.</b> Sida natijjooyinka sahaminta looga warbixiyo	20



## **Nidaamyada Hawlgalka Rasmiga ah (NHR) ee Ayaxa Lama-dagaanka Sahaminta Dhulka**

Ujeedada Nidaamyada Hawlgalka Rasmiga ah (SOP/NHR) Ayaxa Lama-dagaanka ee Sahaminta Dhulka waa inuu ka siiyo tilmaamo qeexan ee hawlgalada shaminta dhulka oo badbaadsan iyo wax ku ool ahba ah kaas oo lagu wajahayo Ayaxa Lama-dagaanka. Tilmaamahani waxaa loogu talogaley iney isticmalaan hawladeenada shaqo-baxa kuwaas oo ku lug leh dabagalka Ayaxa Lama-dagaanka isagoo ka caawinaya kahortagida khatarta, waxtar la'aanta ama hawlgalada aan waxtarka lahayn.

Waxayna la xidhiidhaan Habraacyada Ayaxa Lamadagaanka ee FAO/NHR waana laga helayaa tixraaca iyo xog dheerad ah oo faahfaahsan.

Tilmamayaashu waxay diirada saarayaan:

- qorsheynta sahaminta iyo agabka
- hababka iyo noocyada sahaminta
- warbixinta iyo ururinta xogta
- isticmaalida eLocust3

## **1. Diyaargarowga horumarsan**

Talaabooyinka taxanaha ah ee loo baahan yahay in la raaco kahor, marka lagu jiro iyo kaddib ee sahaminta Ayaxa

### **DIYAARINTA**

#### **(Hawlgalka sahaminta saddex bilood kahor)**

- Go'aanso tirada iyo noocyada gawaadhida ee looga baahan yahay hawlgalka sahaminta
- Xulo kooxda sahaminta oo leh karti, firfircooni iyo iney qataan tababar ama dib u tababartaan
- Adeeg-siinta iyo hubinta gawaadhida
- Hubi in la heli karo baahida caadiga ah ee agab-badalka iyo shaagaga keydka ah, iyo in gawaadhidu ku qalabeysnadaan isgaadhsiinta HF radio (xiligay suurowdo) iyo sanduuqa gurmadka hore
- Hubi kharashka hawl-fulinta qoondeysan ee shaqo u bixitaanka xiliga sahaminta loo qorsheeyey si ay u daboosho gunnada shaqo, shidaalka, Lacag ku shubashada telefanka gacanta, iwm
- Hubi helitaanka agabka ku filan (eLocust3, GPS, radios, compass, maps) koox walba ee sahaminta
- Xaqiji helitaanka nuqlulada diiwaanka caadiga ah ee ku filan sahaminta/xakameynta Ayaxa lama dagaanka ee FAO (HBC)

## 2. kooxda sahaminta & agabka

**Kooxda sahaminta:** hal sargaalka ayaxa, hal dirawal iyo gaadhi. Meelaha fog adeegso laba gaadhi

**Agabka:** koox walba waa iney haystaan

### LOO BAAHAN YAHAY

- eLocust3 ama diiwaanka HBC/FAO (1)
- GPS ka gacanta lagu qaadan karo (2)
- khariirad (1:200-500,000)
- warqad iyo qalin
- Sanduuqa gargaarka degdega ah

### IKHTIYAARI AH

- shabaqa lagu qabto/dabo/ xaaqo
- sanduuqa baadhida
- sanduuqyada muunada
- miiskadhajinta
- weynayso gacmeed -(x10)
- jiheeye
- taarka isgaadhsiinta ee gaariga
- taarka isgaadhsiinta ee gawaarida

1. diiwaanka caadiga ah ee sahaminta/xakameynta ayaxa lamadagaanka HBC/FAO
2. baytariyo dheeri ah, dab-bareesada/burjikada sigaarka, anteeno fogaan-laliso

### 3. Sahaminta kahor

**Talaabada 1<sup>aad</sup>.** Waa in la go'aamiyo xiliga iyo goobta loo baahan yahayin la sahamiyo iyadoo laga duulayo dhammaan xogta suutogalka ah ee ka imanaysa (reer-miyiga, dadka deegaanka, dadka tuuloooyinka, dadka safarka ah)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>.** Khariirad adeegso si ay kaaga caawiso go'aaminta qorshaha marinka sahaminta

**Talaabada 3<sup>aad</sup>.** Diyaarinta gawaarida iyo hubinta iney shaqeynayaan agabka isgaarsiinta & shaqo-bixitaaka, sida eLocust3m. Haddii la isticmaalayo GPS, u habee isku-duwayaasha dhigriiga, daqiqadaha iyo il-biriqsiyadaba

**Talaabada 4<sup>aad</sup>.** Xaqiji in ay sarakiisha sahamintu garanayaan sida loo sameeyo sahaminta iyo adeegsiga agabka


**Talaabada 5<sup>aad</sup>.** Go'aami nooca sahaminta ee la qabanayo. Haddii aadan ogeyn inuu ayax jiro ama uusan jirin, degdeg u samee sahamin indha-indheyn ah. Haddii tiro ayax ah oo badani ay meesha joogtey, kaddib samee sahamin raadin ah si loo qiyaaso baaxada guud ee uu ku habsadey iyo calaamadinta baaxada u baahan in la xakameeyo (fiiri bogaga 13-14)

## 4. Qabashada sahaminta


- Talaabada 1<sup>aad</sup>.** Kahor inta aadan ka tagin xafiiska, guriga ama magaalada, daar aladaada Talaabada 2aad. Waa inaad tagto goob laga filayo ama la hubo inuu joogo (fiiri bogaga 11-12)
- Talaabada 3<sup>aad</sup>.** Ku samee socdaal lug ama gaari goobta sahaminta (fiiri bogaga 7-9)
- Talaabada 4<sup>aad</sup>.** Gudbi warbixinta eLocust3 kahor ka tagida una gudubtid talaabada sahaminta ee xiga; hana sugin illaa ay diranto (fiiri bogaga 17-19)
- Talaabada 5<sup>aad</sup>.** Waxaa kale oo rabitaankaga ku buuxisa foomka rasmiga ah ee sahaminta/xakameynta Ayaxa lama dagaanka ee FAO (HBC) keyd ahaan
- Talaabada 6<sup>aad</sup>.** U dhaqaaq goobta xigta ee sahaminta (Inta ay xogta eLocust3 ay ka dirmeyso)
- Talaabada 7<sup>aad</sup>.** Sii wad illaa maalinta dhamaadkeeda – waxaad awooda inaad sameyso maalinkiiba 4-10 joogsiyo sahamineed

Haddii aad hesho Ayax tiro badan, waxa fiican in lasii wado sahaminta u qorsheysneyd ee aaga marinka si aan fikir uga qaadano xaalada guud. Idinka ama koox kale way usoo laaban karaan si ay baaxada dhulka uu ku habsadey raadin xoogan ugu sameyaan.

## 5. Abaabulida sahaminta









**Hal gaadhi:** waxaa loo isticmaali karaa marka lagu jiro sahaminta meelaha ciida niista la joojiyo ee leh dhir/baadka cagaaran.



**Laba gaadhi:** waxay labada gaadhi soo koobi karaan baaxada dhulka ugu dhawaan labajibaar. Marka gaadhiga hore sahaminayo, gaadhiga labaad wuxuu kasii horeynaya illaa 5 km dabadeedna uu sahamiyo. Dhameystirka gaadhiga hore kaddib, wuxuu u tagi kulanka gaadhiga labaad. Labadooduba si wadajir ah ayey usii socon illaa gaadhiga hore uu u istaago sahaminta halka gaadhiga labaad uu sii wadayo 5 km oo kale iyo sahamin joogsi.

## 6. Hababka sahaminta – lug-kugooshida

<p><b>1. Meel baad leh jooji, Isticmaal eLocust3</b></p> 	<p><b>2. Dabeysha wajah</b></p> <p>Dabeysha →</p> 	<p><b>2a. Kala baahid</b></p> <p>Dabeysha →</p> 
<p><b>3. Hubi deegaanka</b></p> 	<p><b>4. Ayaxa tiri</b></p> 	<p><b>5. Koronkorta tiri</b></p> 
<p><b>6. Lugee 100–300+ m</b></p> <p>&gt;50m → Dabeysha</p> <p>&gt;100m → Dabeysha</p> <p>→ Dabeysha</p> 	<p><b>7. Dhamee eLocust3 (ama foomka FAO)</b></p> 	<p><b>8. Tag jogsiga xiga</b></p> 

## 6. Hababka sahaminta – lug-kugooshida


### **kugoshibaanka lugta (wakhtiga ugu badnaan: 20 daqiiqo)**

- Soco illaa 300 m adigoo jihada dabeysha wajahaya ama iskutalaabaya
- Ufiirso cagaarnida/magoolka iyo cufnaanta dhirta
- Dhowr jeer joogso si aad u hubiso qoyaanka/reyska carrada
- Ayaxa-baalale kasta tiri kaas oo duulaya, qor midabka, dabeeecada iyo weynaanshihiisa (qiyaas balaca xariijimaha sida uu ayax-baalale yahay mid baaba'dey badanaa waa illaa 1-4 m ee dhinaca kale ku-soo xiga). Heerkulku waa inuu ka sareeyo 20°C
- Marmar istaag ku samee dhulka baadhitaan dhow iyo baadka koronkorta, adigoo qoraya heerka darajo, midabka, dabeeecada iyo tirada dhir-duur walba ama mitir labajibaaran. Sidan ku celceli illaa 10 jeer
- Qoraal-xafid ku samee eLocust3 iyo/ama Foomka Sahaminta/ Xakameynta Rasmiga ahee Ayaxa Lama-dagaanka FAO/HBC ee indha-indheyntaada
- U dhaqaaq sahamin joogsiga xiga

Haddii aadan haysanin eLocust3, Foomka FAO/HBC isticmaal

## 6. Hababka sahaminta – lug-kugooshida

Ku gooshitaanka gaadhiga (wakhtiga ugu badnaan: 10 daqiiqo)



- U wad jihada dabeysa ka socoto ama isku-talow ugu yaraan 1 km
- U wad si qunyar ah geer hoose/culus sida talabo-qaadka
- Tiri ayaxa baalasha leh ee gaadhiga hor duulaya
- Hayso foganta socodka adigoo isticmaalaya odometer
- Kaliya tiri marka uu heerkulku ka sareeyo 20°C iyo xawaarahaa dabeyshuna ka hooseyso 6 m/s (lix mitir ilbidhiqsiiba)
- Joojinta iyo ku diiwaangalinta indha-indheyntada eLocust iyo/ama foomka rasmiga ah ee sahaminta/xakameynta Ayaxa lama dagaanka ee FAO (HBC)
- U wad sahamint joogsiga xiga

## 7. Sahamunta kaddib

**Talaabada 1<sup>aad</sup>.** Hubi in dhamman warbixinada eLocust3 ay gudubtey iyo in aysan warbixino ku hadhin safka

**Talaabada 2<sup>aad</sup>.** Haddii aan laga maarmeyn, foomasha rasmiga ah ee sahaminta/xakameynta Ayaxa lama dagaanka ee FAO (HBC) oo dhameystiran u gudbi Xarunta Dhexe ee qaybta Ayaxa Heer-qaran

**Talaabada 3<sup>aad</sup>.** Hubi iyo haddii aan laga maarmeyn, agabka dayactir si sahaminta xiga diyaar ugu ahadaan

Haddii aad isticmaaleyso eLocust3, xusuusnow in habeenkii baytariga dabkiisa lasii buuxiyo kahor sahaminta xigta ee qorshahaaga

Haddii taariikhda iyo saacadu aysan saxneyn, waxaad u baahaneysa inaad baytariga gudaha ee tablet ka dibudabeyso adigoo ku daynaya isagoo daaran iyo ku xidhiidhinta korontada (daminaya bandhigida) muddo dhan 3 cisho

## **8. Goorta iyo halka laga sameynayo sahaminta**

### **Halkee**

- Meelaha niista leh ee ay dhirta dabiicigu cagaaran tahay
- Meelaha lama dagaanka ah ee dhawaan roob heshay
- Meelaha ay dadka deegaanku ka warbixiyeen iney ayax arkeen
- Meelaha ayaxu uu horey ugu habsadey ama ay ka qabsoontey xakameyntu
- Meelaha uu ayaxu soo gali karo ee wadamada dariska la ah

### **Goorma**


#### **Sanadka gudihiisa**

- Markuu roobku curto muddo laba todobaad kaddib ah (sug xilli ku filan)
- iney dhirtu soo cagaarto/magooshoo)
- Haddii aan wax xog ah laga haynin meelaha qaar oo ku saabsan roobka,
- xaaladaha cilmi-deegaaneed ama ayaxa
- Si isdabajoog ah marka lagu jiro xilliroobaadka

#### **Maalinta gudaheeda**

- Marka uu heer kulku yahay 20–38°C
- Marka ay cadceedu soo yara baxdo illaa maalinka badhtamaheeda
- Galinka dambe saacado kooban kahor cadceed dhicitaanka

## 8. Goorta iyo halka laga sameynayo sahaminta



## **9. Noocyada sahaminta**

### **Indha-indhayn**


- Noocyada sahaminta hore waxay ka fushaa shaqo-baxa si loo go'aamiyo jiritaanka ayaxa ama dhir-cagaaran
- Waxay ka qabsoontaa meelaha taariikh ahaan uu ka jiro ayax ama uu ku tarmo, dhawaan halka uu roobku ka curtey, ama halka reermiyiga, dadka-deegaanka, kormeerayaasha, beeraleyda, ama wakiilada fidinta beeraha ay kasoo warbixiyeen ayax inuu jiro
- Waxay tahay ujeedadu ayaxa dabagalkiisa iyo xaalada deegaanka sidoo kale in la go'aansado jiritaanka ahmiyada ayax tiro badan kaas oo u baahan in la xakameeyo

### **Raadin**

- Haddii ahmiyada tiro badan oo ayax ah ay jирто xiliyada sahaminta indha-indhaynta kaddib waa in sahaminta raadintu ka qabsoonto.
- Sahamin xoogan oo qiyaseysa baaxada guud ee uu ku habsadey iyo calaamadinta baaxada u baahan in la xakameeyo.
- Natijjada laga helay sahaminta raadinta, misaanka haliseed iyo heerka baahida xakameynta waa la qiyaasi karaa

Haddii tiro hoose oo Ayaxa kaliya la helo xiliga lagu gudajiro sahaminta indhaindhaynta, looma baahna in la sameeyo sahamin raadinta, Marka sahamin kale oo indha-indhayna waa in laga qabto taariikh dambe waxayna ku xidhan tahay xaalada deeganka iyo roobka

## 9. Noocyada sahaminta



## **10. Maxay tahay xogta la ururinayo**

### **Goobta**

- Magaca goobta
- taariikhda
- GPS latitude and longitude (DDMMSS.S) dhigaha & loolka
- Goobta sahaminta deegaanka iyo nooca carada

### **Roobka**

- Qiyaasta taariikhda iyo cadadka roobkii udambeeyay

### **Dhirta**

- Cagaarnida iyo cufnaanta

### **Carada**

- Qoyaan ama qalleyl

### **Ayaxa**

- Joogitaan/maqnaansho
- Muuqaalka (kalinimo, kumeelgaadh, isku-dhafan)
- Dabeeecada (go'doon, baahsan, kooxeysi)
- Koritaan (darajo-koronkor, xuub-siibasho, aan-tarmeyn, tarmaya)
- Taranka (isfuulaya, dhalaya/dhasaya, dilaacaya, baalaleyn)
- Cufnaanta (ayaxa/talaabo-socod, dh X b ama /m2)
- Cabirkha (tiro m<sup>2</sup> , hiktar)

### **Xakamaynta**

- Dulin-dile, xadi-adeegsiga,cadadka laisticmaalay, dhulka laga xaka-meeyay

## **11. Sidee xogta loo keydinaya**

Xogta sahaminta iyo fiir-fiirintuba waa in la galin karaa eLocust3 ama lagu qori karaya Foomka Rasmiga ah ee Sahaminta/Xakameynta Ayaxa Lama Dagaanka ee FAO/HBC (ama foom la mid ah)

### **eLocust3**

- Waxaa la galin karaya xogta ka timid sahamin tiro joogsiyada aan xadka lahayn
- Dir xogta ka timid sahamin joogsiga kahor inta aanad u dhaqaaqin goobta xigta
- eLocust3 waxaa ku keydsamaya nuqlu xog ah

### **Foomka sahaminta**

- Xogta ka timid saddexda sahamin joogsi waxaa la galin karaa Foomka Rasmiga ah ee Sahaminta/Xakameynta Ayaxa Lama Dagaanka ee FAO/HBC oo hal xabo ah
- Haddii aad samayso joogsiyo saddex ka badan, isticmaal foomam dheeri ah
- Gal xogta ka timid sahamin joogsiga kahor inta aanad u dhaqaaqin goobta xigta

eLocust3 wuxuu si degdeg ah ugu diraa natijada sahaminta Qeybta Xarunta Dhexe ee Ayaxa. Haddii aadan isticmaaleyn eLocust3, markaa waa inaad hesho foomasha oo dhameystiran ugu dir FH radio (taar mawjad dheere ah), fax (fakis) ama ugu dhiib qof Xarunta Dhexe sida suurtogalka ah ee ugu dhakhsiyaha badan

## 12. Isticmaalida eLocust3

- Talaabada 1<sup>aad</sup>.** Marka aad ka dhaqaaqeysyo xafiiska ama xerada tablet ka daar; hubi in taariikhda iyo saacaduba saxan yihiin
- Talaabada 2<sup>aad</sup>.** Ku xidh/saar anteenada dusha sare ama kabadhka hore ee gaadhiga iyo ku xidhitaanka xadhiga anteenada iyo soketka laga shito sigaarka
- Talaabada 3<sup>aad</sup>.** Marka aad gaadho goobta sahaminta, dami guuxa gadiidka, waa inaad qaadato eLocust3m ka
- Talaabada 4<sup>aad</sup>.** Taabo NEW REPORT/Warbixin cusub iyo hubinta iney saxan yihiin GPS coordinates ku. Kani wuxuu ku xidhiidhsamayaa goobta halka GPS coordinates/Dhigaha iyo Loolka uu is gadgadinayo kolba dhaqaaqa aad sameyso
- Talaabada 5<sup>aad</sup>.** Waa inaad lug ku marto iyo gudo u galitaanka xogta
- Talaabada 6<sup>aad</sup>.** Kaddib marka dhammaan la gudo-galo, taabo badhanka SAVE/ SEND Talaabada 7aad. Marka uu dirawalku arko inaad ku soo laabeynayo dhinaca gaadhiga, waa inuu istaadho jiiinka
- Talaabada 8<sup>aad</sup>.** eLocust3 wuxuu bilaabi doona inuu diro xogta marka aad kusoo dhawaato ama aad ku jirto gaadhiga gudihiiisa. Marka xogto way xafidan tahay ku soco sahamin joogsiga xiga balse ha damin injiinka xiliyada ay xogtu dirmeyso
- Talaabada 9<sup>aad</sup>.** Raac horusocodka xogta dirmeymeysa dhinaca hoose ee tablet ka (Xidhidhsanka/Connection: Socda/ Idle – Kuxidh,aya/Connecting to BT – Kusiixidhmaya/ Connecting to DAYAX-GACMEEDKA/SAT – Dirmaya/ Sending – Dirmey/Sent) iyo Safku/Queue wuxuu noqon doona 0

Mrwalba ogow inuu daarnaado aalada eLocust3 ee ah xiliyada lagu heeganka loogu jiro ee maalinimo si aad u hubiso inuu saxan yahay dhigaha & loolku ama GPS oordinates

## 13. Isticmaalida eLocust3m

eLocust3m waxaa loo isticmaali karaa laba qeybood: GUNDHIGA (Xogta kaliya ee ugu yar) iyo SI GUUD (Xogta dhammeyska tiran ee cilmi-deeganeedka, ayaxa, xakameynta iyo bad-qabka)

- Talaabada 1<sup>aad</sup>**. Fur eLocust3m app ka mobilkaaga casriga ah iyo ku xidhiidhinta internet ka inta aanad ka dhaqaaqin kahor xafiiska ama guriga
- Talaabada 2<sup>aad</sup>**. Marka aad gaadho goobta sahaminta, dami guuxa gadiidka, waa inaad qaadato eLocust3m ka
- Talaabada 3<sup>aad</sup>**. Guji ALL REPORTS/Warbixinada dhan ee hoosta bogga Home ka
- Talaabada 4<sup>aad</sup>**. Guji BASIC REPORT/Warbixinada gundhiga haddii aanad u lahayn khibrad, isticmaal kaliya xogta ugu yar (Ayaxa noociisa, baaxada dhulka la sahamiyey ama la buufiyey)
- Talaabada 5<sup>aad</sup>**. Hubi in dhammaan xogtii loo baahna ee shaqo-baxa aad dhameystirto
- Talaabada 6<sup>aad</sup>**. Ka qaad sawir muuqda adigoo u dhaweynaya ayaxa ama, haddii uusan ayax jirin, si guud deegaanka korka uga sawir
- Talaabada 7<sup>aad</sup>**. Guji SUBMIT/Gudbi si aad warbixinta ugu dirto Xarunta Dhexe ee Qeypta Ayaxa; haddii uusan khad/network jirin dib ayuu si toos ah ugu dirmayaa
- Talaabada 8<sup>aad</sup>**. Warbixintaadu waxay ku keydsameysa gudaha ALL REPORTS/ Warbixinada dhan xiliga aad awoodo guji si aad u fiiriso warbixinta oo faahfaahsan
- Talaabada 9<sup>aad</sup>**. Warbixintaada waxaad kula wadaagi kartaa oo kale gudaha chat ka si ay u arki karaan isticmalayaasha kale ee wadankaaga

Guji wadasheekaysiga/CHAT ka u dir qoraal iyo la wadaagida sawiro & muuqaalo

## 14. Isticmaalida eLocust3g



Badhanka sare ee GPS  
ka riix/tuuji si aad u  
daarto/shido iyo sugitanka  
bogga hoyga





Guji  calaamadiinta Send  
Message/dirda fariinta, kaddib  
guji




Isticmaal   
yo  inaad galiso illaa  
4 tiro, isticmaal kusoco  
Done/hirgaley, guji




Guji kaddib ku soco  
Forms ama foom ka kaddib  
guji




Waxaa jira hal foom oo  
la dhaho Locust/Ayaxa,  
guji




Guji illaa aad ka  
helayso heerka loo  
baahan yahay iyo  
midabka ayaxa



Hal jeer oo ah heerka loo  
baahan yahay uu calaamadiyo  
guji



Kaddib guji illaa Area  
(ha)/Aaggaa uu calaamadiyo,  
kaddib guji



Guji iyo kuceliska  
talaabooyinka 5-6 sida  
heerarka kale ee jira ama  
dabeeecadaha

Haddii uusan ayax joogin, dabadeed iska dhaaf meel walba oo  
bannaan marka laga reebo baaxada dhulka la sahamiyey

## **15. Sida natijjooyinka sahaminta looga warbixiyo**

### **eLocust3**

Kani waa habka la doorbidey ee ay isticmalaan kooxaha ayaxa qaranka sida duubida, gudbinta xogta oo dhan iyo fiir-fiirinta wakhtigii shaqobaxa dhabta ahay iyadoo loo marayo dayax-gacmeedka. Waxaa xogta si degdeg ah looga heli karaa minbarka GeoFlex iyo email u dirida Xarunta Dhexe Ayaxa ee xiliyada fiidnimo. Noqol xog ah ayaa ku keydsameysa tablet ka. eLocust3 waxaa kale oo loo isticmaali karaa dLocust (drones ka).

### **eLocust3m / eLocust3g**

Gundhiga iyo xogta oo dhan waxaa lagu duubi karaa aalada isticmaalka mobilada casriga ah/ smartphone app (eLocust3m) halka laga gali karo gundhiga kaliya GPS ka gacanta ee ku xidhiidhsan dayax-gacmeedka (eLocust3g). Labadan aaladood, dhigaha iyo loolka sahaminta ama xakameyn ta si toos ah ayey ugu qeexan yihiin. Galitaanka xogta gundhigu aad ayey u fududahay iyo waxa kaliya oo ay u baahan tahay tababar gaaban. Waa muhiim in la isticmaalo inta lagu jiro xaalada degdega ah ee kooxaha dheeriga ah kuwaas oo aqoon iyo khibrad yar u leh. Dhammaan xogta waxaa lagu soo bandhigey khariirada oo ah cloud platform ama minbarka daruuraha iyo in laga soo dajisan karo. Waxaa xogta looga helay si dhab ah ama u dhow wakhtiga dhabta ah ee Qeypta Ayaxa Xarunta Dhexe

### **Foomasha sahaminta**

Xogta sahaminta iyo xakameyntu waxaa lagu xafidi karaa Foomka Rasmiga ah ee Sahaminta/Xakameyn ta Ayaxa Lama Dagaanka ee FAO/ HBC (ama foom la mid ah) iyo u gudbinta Qeypta Ayaxa Xarunta Dhexe muddo 1 – 2 cisho ah loona marinayo HF radio (Taarka mawjad dheere ah), mobaylka (sawir), Fax/fakis, baraha bulshada ama qof ugu dhiib.



